

Gacaliye Saaxiib,

Dawlad ahaan Walz wuxuu kordhiyey xiritaanka iskuulka ee COVID-19 dhammaadka sanad dugsiyeedka, shaki kuma jiro dhammaan macallimiinta, qoysaska, iyo ardayda inay qaadanaayaan kor u qaadis weyn ee e-learning. Waxaan si joogto ah kaaga maqalnay adiga - iskaashatada bulshada – ku saabsan caqabadaha dheeraadka ah ee qoysaska aan khibradda u laheyn sida ay ugu dadaalayaan inay taageeraan guusha tacliimeed ee carruurtooda.

In kasta oo ay sanjirin khayraado taageeraysa qoysaska aan ku hadlin Ingiriisiga iyo qoysaska ay haysato caqabadaha xagga teknoolajiyada (waxaan ku dhiirigelineynaa in aan la wadaagno wixii aad soo dhaafto), toddobaadkan waxaan rabnay in aan sare u qaadno khayraadada taageeraya qoysaska taageeraya waxbarashadooda.

Shabakadda Khan Academy

Waalidku waxay heli karaan [talooyin iyo hagitaan](#) ku saabsan sida looga hawlgalo oo loogu dhiirrigeliyo waxbarashada guriga.

Khan Academy wuxuu kaloo bixiyaa [jadwal maalinle ah iyo jadwal waxbarasho](#) oo todobaadle ah oo waalidiinta loogu talagalay inay ku taageeraan ardaydooda guriga.

Hagaha Xarunta Qaranka ee Waxbarashada Naafada

[Boggankali ah wuxuu leeyahay talooyin](#) loogu talagalay waalidiinta sida ugu wanaagsan ee loogu taageeri karo ardayda itaalka darran waxbarashada inta lagu jiro barashada masaafada.

Xaruntu waxay sidoo kale [soo koobtay jawaabta federaalka](#) ee COVID-19 iyo sida ay u saameyn karto qoysaska iyo barashada.

Dib loo soo celinta Khayraadka Waxbarasho

Ururka samafalka wuxuu soo aruuriyey in kabadan [100 ilo wax barasho masaafo ah](#), ooy kujirto qayb loogu talagalay waalidiinta iyo qoysaska.

Waxaad sidoo kale maanta sameyn kartaa wax ka qabashada carqaladaha tikniyoolajiyada ee qoysaska ay wajahayaan adoo kaqeyb galaya [feejignaanta talaabada EdAlliessi](#) aad ugu dhiirigeliso sharci dejiyayaasha gobolka inay hubiyaan in ardayda oo dhami helaan marin internet lagu kalsoonaan karo.

Fadlan sii [wadinaad na siiso jawaab celin](#) ku saabsan waxyaabaha aad rabto inaad aragto sidoo kale na

soo ogeysii wixii kheyraad ah ee aad u maleynayso inay weyn yihiin.

Wada shaqeynta,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Osman Ahmed", is centered within a white rectangular box.

Osman Ahmed
Agaasimaha Iskaashiga Bulshada

Ps. Marwada hore ee Madaxweynaha Michelle Obama ayaa [kor u akhrisay buugagta carruurta](#) (gebi ahaanba) maalin kasta Isniinta duhurkii (11 g.h. Waqtiga Minnesota) –waanu jecelnahay tan oo waxaan filaynaa inaad adiguna tahay sidoo kale!